# WARMURTIYEEDKA SHIRWEYNAHA WAXBARASHADA QARANKA, MUQDISHO, Maarso 13-17, 2023

---

**Arar**

Shirweynaha Waxbarashada Qaranka oo socday intii u dhaxeysay 13-17kii bisha Maarso, 2023, ayaa maanta lagu soo gabagabeeyey magaalada Muqdisho. Halkudhagga Shirweynaha oo ahaa "*Waxbarasho Habboon oo Tayeysan, Isbeddel Bulshana Horseedda*" ayaa waxaa qabatay Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare (WWH&TS) ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.

Furitaanka Shirweynaha waxaa lagu qabtay *Teendhada Afisyooni*, Gegida Diyaaradaha ee Aadan Cabdulle ee magaalada Muqdisho, iyada oo afartii maalmood ee xigtayna lagu qabtay Hotel Jazeera. Shirweynaha waxaa lagu soo bandhigay warbixin guud oo ku saabsan xaaladda waxbarashada dalka guud ahaan iyo waxqabadkii la gaaray iyo caqabadihii soo wajahay WWH&TS tobankii sano ee la soo dhaafay. Waxaa kale oo Shirweynaha lagu soo bandhigay 15 cilmi baaris iyo 7 soojeedin, oo si qoto dheer loogu eegayey waxbarashada dalka. Ujeeddada guud ee Shirweynahu waxa ay ahayd in dib-u-eegis iyo falanqayn lagu sameeyo xaaladda waxbarashada dalka, islamarkaana la ogaado caqabadaha iyo fursadaha jira, lagana soo saaro fikrado halabuur leh iyo go'aanno la fulin karo mustaqbalka dhow, kan dhexe iyo kan fogba.

Shirweynaha waxaa ka soo qaybgalay 450 qof oo ka kala socday hay'adaha dawladda Federaalka Soomaaliya; madaxda ugu sarraysa Wasaaradaha Waxbarashada ee dalka, heer Federaal iyo heer Dawlad-Goboleed; Maamulka Gobolka Banaadir; Dalladaha Waxbarashada; Jaamacadaha; Ururrada Macallimiinta; Cilmibaarayaal; Aqoonyahanno ka kala yimid dalka iyo dibeddiisaba; Culimada; Ururrada Bulshada; Wakiillo ka socday shirkadaha ganacsiga ee ugu caansan dalka; waalidiinta; ardayda; hay'adaha waddaniga ah ee aan dawliga ahayn; Haweenka; Warbaahinta, Wakiillo ka socday Bahwadaagta Waxbarashada Caalamiga ah, Deeq-bixiyeyaasha iyo qaar ka mid ah Safaaradaha dalalka shisheeye u fadhiya Soomaaliya. Waxaa kale oo xusid mudan in Shirweynaha ay ka soo qaybgaleen wasiiradii hore ee Waxbarashada iyo Tacliinta.

Wasiirka WWH&TS ee Dawladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Faarax Sheekh Cabdiqaadir ayaa ugu horreyntii khudbad isugu jirtay soodhawayn iyo warbixin xaaladda waxbarashada dalka ka jeediyey Shirweynaha; waxaana Shirweynaha si rasmi ah u furay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Dr. Xassan Sheekh Maxamuud oo shirka ka jeediyey khudbad taariikhi ah, oo ku aaddan horumarinta waxbarashada ubadka Soomaaliyeed. Madaxweynuhu waxa uu shirka kaga dhawaaqay in Dawladdu ay aragti fog iyo qorsheyaal si weyn looga baaraan degay ay ka leedahay baahinta iyo tayeynta waxbarashada ubadka Soomaaliyeed, tababarka macalimiinta heerarka kala duwan, maalgelinta waxbarashada iyo guud ahaanba in kor loo qaado aqoonta iyo wacyiga ummadda Soomaaliyeed iyo dib u-dhiska dalka

iyada oo loo marayo waxbarasho habboon oo tayeysan, islamarkaasna horseedda isbeddel bulsho. Waxaa sidoo kale, xafladda furitaanka shirweynaha ka hadlay Ra'iisul Wasaare ku Xigeen xukuumadda Federaalka, Mudane Saalax Jaamac iyo Kuxigeenka Wakiilka Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, UNSOM Soomaaliya, Marwo Kiki Gbeho. Shan maalmood oo uu shirku si habsami leh u socday, waxaa si qurux badan u soo xiray Guddoomiyaha Golaha Shacabka, Mudane Aadan Maxamed Nuur (Madoobe).

Muddadii uu Shirweynuhu socday waxaa ka qaybgalayaashii ay diiradda saareen arrimo muhiim sida:

- b. Ahmiyadda lahaanshaha Soomaaliyeed ee qorshaynta, maareeynta iyo baahinta waxbarasho loo dhan yahay.
- t. Dib u eegista yoolalka, ujeeddooyinka iyo miradhalka waxbarashada qaranka.
- j. Horumarinta adeegyada waxbarashada iyo katashiga caqabadaha jira iyo soo bandhigidda fikrado cusub oo wax ku ool ah islamarkaasna xambaarsan aragti fog, si wax looga qabto caqabadaha jira.
- x. Abuuridda fikrado cusub oo ku saabsan ballaarinta, helitaanka, iyo horumarinta tayada waxbarashada.
- kh. In la helo hannaan maamul oo si hufan u hagi kara waxbarashada dalka oo dhan.
- d. In la helo nidaam ku salaysan isku tashi oo lagu maalgelin karo waxbarashada qaranka

## GO'AANNADA IYO TALOOYINKA KA SOO BAXAY SHIRWEYNAHA

Iyada oo laga duulayo natiijooyinkii ka soo baxay bandhigyadii iyo cilmibaarisyadii la soo jeediyey muddadii Shirweynaha uu socday; iyada oo la tixgalinayo doodihii, falanqayntii iyo talo- soo-jeedintii aqoonyahanadii iyo ka qaybgalayaashii shirweynaha; Shirweynuhu waxa uu soo saaray talooyinka soo socda:

### 1. WAXBARASHADA AASAASIGA AH

- b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in mudnaanta ugu sarreysa ay wasaaraddu siiso helitaanka waxbarasho aasaasi ah oo tayo leh, islamarkaana ay awoodi karaan ardayda dalka oo dhan.
- t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in wasaaraddu dib u eegis ku samayso xaaladda Dugsiyada Qur'aanka iyo sidii tayadooda kor loogu qaadi lahaa, gaar ahaan dugsiyada bixiya waxbarashada isku dhafan, loogana faa'iidaysto fursadaha jira ee dugsiyadaas dhanka baahinta waxbarashada toosan ee heerka asaasiga ah, gaar ahaan fasallada 1- 4 ee Dugsiga Hoose.
- j. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in khubaro ka socota Wasaaradaha Waxbarashada; Arrimaha Diinta iyo Awqaafta iyo Caafimaadka loo xilsaaro in ay baaris ku sameeyaan xaaladaha iyo dhibaatooyinka ka jira Dugsiyada Quraanka kariimka, lana qeexo doorka wasaaradaha ay khusayso.
- x. Shirweynuhu waxa uu islaqaatay in ahmiyad gaar ah la siiyo badqabka iyo caafimaadka ardayda joogta goobaha waxbarashada.

kh. Waxaa kale oo uu shirweynuhu ku baaqayaa in dib loo billaabo ololaha ciribtirka akhris-qoris la'aanta.

d.Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in la horumariyo lana tayeeyo adeegga waxbarashada dhallaanka (Xannaanada).

r. Shirweynuhu waxa uu ku baaqayaa in wasaaraddu ahmiyad gaar ah siiso adeegga waxbarashada xilliyada xaaladaha deg-degga ah.

## 2. WAXBARASHADA DUGSIYADA SARE

b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in waxbarashada dugsiyada sare ay noqoto mid ku habboon mudnaanta iyo baahiyaha bulshada, islamarkaana la xoojiyo waxbarashada ku aaddan xirfadaha iyo farsamada.

t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in Wasaaraddu, iyada oo kaashanaysa maalgashadeyaasha gaarka ah iyo deeq-bixiyeyaasha, dhisto dugsiyo sare oo lagu barto xirfadaha iyo farsamada gacanta.

## 3. TACLIINTA SARE

b. Shirweynuhu waxa uu bogaadinayaa doorka muhiimka ah ee a jaamacaduhu kaga jiraan tacliinta sare ee dalka.
t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in la dhiso Guddiga Tacliinta Sare, kaas oo ah mid madaxbannaan, oo kusalaysan mutaysi xirfadaysan. Guddigu, isaga oo la tashanaya jaamacadaha iyo macaahidda sare, waa inuu xal u raadiyaa sidii looga gudbi lahaa caqabadaha hortaagan waxbarashada Tacliinta Sare ee dalka.
j. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in waxbarashada sare ee dalka lagu jiheeyo sidii loo heli lahaa xirfadlayaal ka jawaabi kara baahiyaha dhaqan-dhaqaale ee dalka.
x. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in jaamacadaha dalku ay xoogga saaraan wax soo saarka cilmibaarista, islamarkaana ay jaamacaduhu bixiyaan hal sano oo koorsooyin aasaasi ah (*foundation programmes*), ka hor inta aysan ardaydu bilaabin maaddooyinka rasmiga ah ee manhajka jaamacadaha.

## 4. TABABARKA, MAAMULKA IYO HORUMARINTA XIRFADDA MACALLIMIINTA

b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in Wasaaraddu xoogga saarto diyaarinta, maaraynta iyo horumarinta aqoonta iyo xirfadaha macalimiinta, iyada oo loo marayo saddex marxaladood: tababarid, shahaado-siin iyo rukhsad-siin.
t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in wasaaraddu mudnaan gaar ah siiso tayeynta aqoonta, xirfadaha; shaqaalaysiinta iyo haynta macalimiinta. Sida oo kale, Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in gobollada dalka laga hirgeliya xarumo lagu tababaro macalimiinta.
j. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in wasaaraddu kordhiso macalimiinta dumarka waxbarashada qaybaheeda kala duwan.

## 5. WAXBARASHADA GAARKA LOO LEEYAHAY

b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in Wasaaraddu si xooggan u dhiirrigeliso waxbarashada gaarka loo leeyahay, islamarkaana, la sameeyo dugsiyo heer caalami ah oo gaar loo leeyahay, si looga jawaabo baahida sii kordheysa ee adeegga waxbarashada.
t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in waxbarashada gaarka loo leeyahay ay xoogga saarto Sayniska, Tignoolajiyada, Injineernimada, Xisaabta iyo Luqadaha.

## 6. TIKNOLOOJIYADDA IYO HAL-ABUURKA WAXBARASHADA

b. Shirweynuhu waxa uu ku baaqayaa xoojinta waxbarashada danabaysan (elektarooniga) ee dhammaan heerarka waxbarashada.
t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in dugsiyada lagu qalabeeyo aaladaha shaybaarka, maktabadaha, kombiyuutarrada, iwm.
j. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in la dhiirigeliyo hal-abuurka waxbarashada casriga ah.

## 7. HORUMARINTA AFKA SOOMAALIGA

b. Shirweynuhu waxa uu ku baaqayaa in la horumariyo afka Soomaaliga, islamarkaana lagu dhigo dhammaan heerarka kala duwan ee waxbarashada.
t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in la horumariyo iyo halbeeg-u-yeelidda eray-bixinta afka Soomaaliga.
j. Shirweynuhu waxa uu qurbajoogta Soomaaliyeed ugu baaqayaa in ay kaalin mug leh ka qaataan horumarinta waxbarashada iyo ilaalinta dhaqanka suuban ee ummadda Soomaaliyeed. Sidoo kale, waxa uu ku baaqayaa in wasaaraddu ay ka caawiso carruurta Soomaaliyeed ee qurbajoogta ah xoojinta afka iyo dhaqanka Soomaaliyeed.

## 8. DOORKA WARBAAHINTA EE HORUMARINTA WAXBARASHADA

b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in warbaahinta, gaar ahaan warbaahinta dawladda, looga faa'iidaysto baahinta waxbarashada.
t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in wasaaraddu ay xoogga saarto howlgelinta iyo ka faa'iidaysiga warbaahinta noocyadeeda kala duwan, si bulshada loogu wacyigeliyo muhiimadda waxbarashadu leedahay.
j. Shirweynuhu waxa uu dhiirigelinayaa in la qabto doodo, kulammo aqoon-iswaydaarsi ah iyo barnaamijyo kale oo ku aaddan horumarinta waxbarashada.

## 9. WAXBARASHADA ARDAYDA BAAHIYAHA GAARKA AH QABA IYO NAAFADA

Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in la abuuro nidaam waxbarasho dawladeed oo ku wajahan dadka naafada ah iyo caruurta baahiyaha gaarka ah leh, islamarkaana wasaaradda lagu soo kordhiyo waax dhamaystiran oo u xilsaaran fullinta muhimaddaas.

## 10. WAXBARASHADA BARAKACAYAASHA, CARRUURTA JOOGTA GOOBAHA DHAWAAN LA XOREEYEY IYO KUWA KU NOOL DEEGAANNADA FOG

Shirweynuhu waxa uu ku baaqayaa in taakuleyn waxbarasho loo fidiyo caruurta xoolo-dhaqatada reer guuraaga ah, barakacayaasha, deegaannada fog iyo kuwa ku nool dhulka dhawaan la xoreeyey ama la xorayn doono.

11. **HORUMARINTA WAXBARASHADA GABDHAHA**

Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in waxbarashada gabdhaha la siiyo mudnaan gaar ah, iyada oo xal loo helayo caqbadaha ku gudban horumarkooda.

**12. TAYEYNTA IYO MIDAYNTA WAXBARASHADA**

b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in wasaaraddu ay iswaafajiso dhammaan manaahijta jirta, oo ay noqdaan manhaj qaran oo midaysan. Tayada manhajka waa in la waafajiyaa halbeegyada caalamiga ah, islamarkaana uu ka jawaabaa baahiyaha tacliimeed, diimeed, wadaninimo iyo tan ummadnimo.

t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in dalku yeesho Guddiyada Manaahijta iyo Imtixaanaadka Qaranka, kuwaas oo ka howlgala dalka oo dhan.

j. Shirweynahu waxa uu islaqaatay in Wasaaraddu hubiso in ay dugsiyada dalku buuxiyaan saacadaha iyo sanadaha waxbarashada ee ku xusan Qaab-dhismeedka Manhajka Qaranka.

**13. TAYAYNTA BARNAAMIJKA MAAREEYNTA XOGTA WAXBARASHADA (EMIS)**

b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in wasaaraddu sare u qaaddo Xafiiska Maareeynta Xogta Waxbarashada Qaranka, isla markaana, la helo xog dhamaystiran oo ku saabsan waxbarashada dalka oo dhan.

t. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in la kobciyo aqoonta, xirfadda, farsamada iyo wacyiga shaqaalaha xafiiska.

**14. MAAREYNTA DEEQAHA WAXBARASHADA**

Shirweynuhu waxa uu garwaaqsaday muhiimadda ay leedahay in hannaan hufan oo daah-furan loo maro maareeynta deeqaha waxbarashada. Haddaba, Shirweynuhu waxa uu ku talinayaa in Wasaaradda Waxbarashada heer Federal ay soo saarto habraac loo marayo maareeynta deeqaha waxbarashada.

**15. DIINTA IYO WADDANIYADDA**

b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in la xoojiyo maaddooyinka diinta iyo kuwa waddaniyadda, islamarkaasna ay si mug leh uga muuqdaan manhajka waxbarashada dalka.

t. Shirweynuhu waxa uu ku baaqayaa in mudnaan gaar ah la siiyo kobcinta waxbarashada macaahidda sharciga; islamarkaana ay wasaaraddu qaadato doorkeeda kaga aaddan arrintaas, oo loo fidiyo macaahidda sharciga ah wixii taageero ah ee suurtagal ah.

j. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in la qabto shirweyne qaran oo looga arrinsanayo horumarinta iyo maamulka Dugsiyada Quraanka iyo Macaahidda Diinta Islaamka lagu barto.

x. Shirweynuhu waxa uu ku baaqayaa in la dhiirrigeliyo hirgelinta adeegyada maktabadadaha, matxafyada, dhaqanka iyo suugaanta u adeegaya waxbarashada iyo horumarka bulshada.

16. **MAALGELLINTA WAXBARASHADA**

b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in maalgelinta waxbarashada ubadka Soomaaliyeed lagu saleeyo iskutashi iyo iskaashi ummadeed.
t. Shirweynuhu waxa uu ku baaqayaa in la sameeyo/abuuro Sanduuq Dhaqaale Waxbarasho Qaran, kaas oo yeelanaya habraac sharciyeed oo haga, suurtagelinayana in ay bulshada Soomaaliyeed iyo deeq-bixiyeyaasha kaga qaybqaataan maalgelinta waxbarashada dalka.
J. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in la kordhiyo miisaaniyadda dawladda (heer federal and dawlad-goboleed), lana joogteeyo bixinta miisaaniyadda waxbarashada.
x. Shirweynuhu waxa uu dhiirrigelinayaa tayaynta hannaanka maamulka iyo maaliyadda ee wasaaradaha waxbarashada.
kh. Shirweynuhu waxa uu ku dhiirigalinayaa ganacsiga gaarka loo leeyahay in uu qayb ka noqdo maalgelinta waxbarashada.
d. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in ay wasaaraddu cilmibaaris ku samayso sida ugu habboon ee looga faa'iidaysan karo maalgelinta waalidka, si kor loogu qaado tayada waxbarashada carruurta.
r. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in maalgelinta waaliddiinta ee waxbarashada ay ka muuqato miisaaniyadda guud ee waxbarashada dalka.
s. Shirweynuhu waxa uu ku talinayaa in deeq-bixiyayaasha iyo saaxiibbada caalamiga ah ee taageera waxbarashada ay taageerada dhaqaale ee waxbarashada mariyaan hannaanka maamul-maaliyadeedka dawladda (*Single Treasury Account*), si loo yareeyo kharashyada ku baxa hannaanka gacmaha badan ee hadda jira.
sh. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in mashaariicda waxbarashada lagu taageero loo qorsheeyo si ku salaysan halbeeg caddaalad ah oo daah-furan.
dh. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in deeq-bixiyeyaasha iyo bahwadaagta waxbarashada ee caalamiga ah ku saleeyaan maalgelinta waxbarashada mid saameyn iyo natiijo leh.
c. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in Wasaaradda Waxbarashadu ay dib u eegis ku sameyso waxtarka mashaariicda/barnaamijyada socda.

**17. DIB U HABAYNTA NIDAAMKA IYO MAAMULKA WAXBARASHADA**

b. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in lagu saleeyo waxbarashada dalka qiyamka Islaamnimada iyo Soomaalinimada, si loo helo waxbarasho dalka u horseedda nabad, wadanoolaasho, waddaniyad, midnimo iyo hayb-qaran.
t. Shirweynuhu waxa uu dalbanayaa in caruurta Soomaaliyeed ay helaan waxbarasho tayo leh, loo dhan yahay, islamar-ahaantaana, la gaarsiiyo carruurta aan fursadda u helin waxbarashada.
j. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa dhameystirka xeerka iyo siyaasadda qaran ee waxbarashada dalka, iyada oo la marinayo wadatashiyo dhex-mara qaybaha kala duwan ee bulshada.
x. Shirweynuhu waxa uu codsanayaa dhismaha hay'adaha iyo guddiyada waxbarasho heer qaran iyo daadejinta waxbarashada heer gobol, degmo iyo bulsho.

kh.Shirweynuhu waxa soo jeedinayaa in dib-u-habayn lagu sameeyo qaab-dhismeedka nidaamka waxbarasho ee hadda jira si uu uga jawaabo baahiyaha iyo mudnaanta horumarinta waxbarashada gaar ahaan tan xirfadaha iyo farsamada.

d. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in dib loo hawlgeliyo Barnaamijka *Shaqada Qaranka* ee ardayda dhamaysata dugsiyada sare.

r. Shirweynuhu waxa uu soo jeedinayaa in dib u eegis lagu sameeyo, lana dhaqangeliyo xeerka waxbarashada (Education Act) iyo siyaasadaha waxbarashada qaranka.

## 18. WAXBARASHADA IYO ISBEDDELKA CIMILADA

- Shirwaynuhu waxa uu ku baaqayaa in maaddada deegaanka iyo isbaddelka cimilada lagu xoojiyo manhajka qaranka.

## 19. MAHADCELIN IYO BOGAADIN

Waxaa mahad dhammaanteed leh Allah (SWT) in Shirweynuhu noogu qabsoomay si habsami leh.

- Shirweynuhu waxa uu si weyn u bogaadinayaa hoggaanka sare ee Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare, gaar ahaan Wasiir Faarax Sheekh Cabdulqaadir, oo muujiyey hoggaamin iyo aragti dheer oo ku aaddan horumarinta waxbarashada dalka. Waxaa si gaar ah shirweynuhu u bogaadiniyaa barnaamijka qorista, tababaridda iyo hawlgelinta saddex kun (3,000) oo macallimiin cusub ah, oo qeyb ka noqon doona baahinta iyo tayeynta waxbarashada dalka.
- Shirweynuhu waxa uu si weyn ugu mahadcelinayaa guddiyada qabanqaabada iyo latashiga shirweynaha, oo iska xilsaaray qorshaynta, agaasinka iyo qabsoomidda shirweynaha. .
- Shirweynuhu waxa uu si weyn ugu mahadcelinayaa waaliddiinta Soomaaliyeed iyo doorka muhiimka ah ay ka qaateen maalgelinta waxbarashada.
- Shirweynuhu waxa uu u mahadcelinayaa deeq-bixiyeyaasha iyo hay'adaha caalamiga ah taageerada joogtada ah ee ay u fidiyaan waxbarashada dalka.
- Ugu dambayntii, Shirweynuhu waxa uu si mug leh ugu mahad celinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Ra'iisulwasaaraha xukuumadda, iyo Guddoonka labada aqal ee baarlamaanka dadaalkooda iyo is-garabtaaggooda waxbarashada dalka.

SHIRWEYNAHA

******************DHAMMAAD****************